

Barnmorskemottagningar

Patientinformation: Överburenhet översatt till somaliska

Datum: 2025-02-12

Macluumaad loogu talogaley bukaanka oo ku saabsan marka uu uurku wakhtigiisa dhaafo

Marka uu uurka waakhtigiisa buuxsamo waxaa ay macnaheedu tahay in dhererka uurku uu ku gaadhey inta u dhaxeys todobaadka 37-aad ilaa todobaadka 42-aad ee uurka.. Waxaa aan maanta ognahay in ay jirto halis yar oo oo ku iman karta ilmaha ku jira calooshaa haddii wakhtiga uurku uu xadkaas dhaafo, waxaa taas u sabab ah iyadaa oo hawsha loogu talogaley in ay madheertu qabato iyo waliba nafaqada uu helo ilmaha ku jira caloosha uu hoos u dhac ku yimaado. Haddii la soo de-dejiyo foosha ma korodho halista ah in lagu qalo ilmaha iyo in tuumbo lagu soo jiido marka la bar-bar dhigo haddii si lama filaan ah u bilaabato fooshu marka uurku wakhtigiisa dhaafo. Sidaa aawadeed waxaa lagu taliyaa wakhti xaadirkan in la bilaabo ka foolinta tadobaadka 42+0.

Hal waxyeelo oo ka dhalan karta in laga fooliyo waa in uusan ilmo galeenku runtii diyaar u ahey ama u bisleyn dhalmada, taas oo ay macnaheedu tahay in ilmo galeenku xidhanyahay isla markaana si cufan u adagyahey. Sidaa aawadeed waxaa inta badan loo baahanyahay dabiib ama daaweyn si loogu diyaariyo ilmo galeenka dhalmo ka hor inta aan lagu bilaabin marxalada ka foolinta rasmiga ah. Waxaa tani ay qaadataa

mararka qaarkood hal maalin ama dhowr maalmood. Waxaa daaweynta lagu sameeyaa qaybta ummulaha ee Skövde (BB Skövde)

Waxaa jira dhowr siyaabood oo kala duwan oo loo bilaabi karo ka foolinta taas oo ku xidhan hadba sida uu ilmo galeenku diyaar ugu yahay dhalmada.

1. Haddii uu ilmo galeenku aad diyaar u yahay: waxaa la siyaa kiniin ka kooban maado lagu magacaabo prostaglandin. Waxaa daaweynta lagu cel-celinayaa labadii ama afartii saacadoodba mar, ugu badnaan sideed mar. Muddada ay daaweyntu socoto waxaa sida caadiga ah bilowda xanuunka foosha ee dabiiciga ah. Haddii ay taasi dhici weydo waxaa loo sii guudbaa talaabada taas ixigta ama talaabada 2-aad.
2. Marka uusan ilmo galeenku woxoogaa diyaa aheyn: Tuumbo wadata buufin ayaa la galiyaa ilmo galeenka, inta u dhaxeys madaxa ilmaha iyo dhuunta ilmo galeenka, si ay si dabiici ah oo dabacsan ugu kala baxdo dhuunta ilmo galeenku. Marka ay buufintu banaanka uga soo baxdo waxaa hore loogu sii socdaa xuubka uur jiipta, waxaana laga sameeyaa dalool si uu yimaado xab bur-bur ama biyahu u soo daataan. Muddo yar ka bacdi waxaa inta badan lagu xidhaa faleebo ay ku jirto daawo keenta xannuunka foosha.
3. Marka dhuunta ilom galeenka diyaar tahay isla markaana uu ilmo galeenku furanayah dhowr senti mitir: Waxaa laga sameeyaa daloo xuubka uur jiipta si uu yimaado xab bur-bur ama biyahu u soo daataan. Muddo yar ka bacdi waxaa inta badan lagu xidhaa faleebo ay ku jirto daawo keenta xannuunka foosha.

Marka xanuunka fooshu uu si fiican u bilowdo waxaa caadi ah inta badan in hawsha dhalmadu marxalad caadi ah gaadho.

Marka aad ku soo dhawaato in wakhtigii uurkaagu uu dhaafi rabo wakhtigiisi waxaa ay ummulisda ku qaabilsan ay balan kaaga qaban

doontaa si lagaaga fooliyo qaybta gaarka ah ee daryeelka hooyada uurka leh ee ku taala magaalada Skövde ama Lidköping (maalmaha shaqada) ama qaybta ummulaha (maalmaha fasaxa).

Fadlan la soco in aanan kuu balan qaadi karin in lagaa fooliyo maalin gaar ah maadaama ay wax walba ku xidhanyihiin sida uu yahaya culeyska hawlaha qaybta ummulista ee maalintaas la joogo. Waxaa aan rabnaa fursad ah in aan ku siino daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan waxaa sidaa aawadeed mararka qaarkood wanaagsan in la sugo muddo hal ama dhowr maalmood ilaa culeyska hawlaha qaybta ummulistu yara kala degeyso. Haddii ay taasi dhacdo waxaan sameyn doonaa kontorool dheeri ah oo ku ku wajahan uurka dhaafey wakhtigiisa.

Isbitaalka Skaraborg (Skaraborgs Sjukhus)
QAYBTA HAWEENKA

Marinko Maric

Dhakhtarka masuulka ka ah hawlaha isku duwida
Qaybta gaarka ah ee daryeelka caafimaadka
Hooyooyinka (specialistmödravården)

Anna Trollstad

Dhakhtar sare oo qaabilsan daryeelka
caafimaadka hooyoyinkka
(mödrahälsovårdsöverläkare)